

## Si fudud loo akhrin karo

Hagitaanka Qandaraaska  
Macluumaad ku saabsan  
qandaraaskaada



Si fudud loo akhrin karo



Dukumeentigan waxaa qoray **United Welsh**. Waa nooca sida fudud loo akhrin karo oo **Hagitaanka Qandaraaska aho**.

Diseembar 2022

# Sida loo isticmaalo dukumeentigan

Si fudud loo akhrin karo



Kani waa dukumeenti si fudud loo akhrin karo. Laakiin waxaa laga yaabaa inaad weli caawinaad ugu baahato akhrintiisa. Weydiiso qof aad kasi inuu ku caawiyo.

Ma fahmin



Erayada **ku qoran buluuga tikhdana** ayaa laga yaabaa inay adagtahay in la fahmo. Waxaad kaegi kartaa micnaha erayada buluugga ku qoran bogga 14.

united  
welsh

Meelaha uu dukumeentigu ka dhahayo **annaga**, tani waxaa loola jeedaa **United Welsh**.

Xidhiidhka




Wixii macluumaad dheeraad ah la xidhiidh:  
Websaydka: [www.unitedwelsh.com](http://www.unitedwelsh.com)  
limaylka: [tellmemore@unitedwelsh.com](mailto:tellmemore@unitedwelsh.com)  
Taleefonka: 0330 159 6080

---

# Tusmada

|   |    |
|---|----|
| Sida loo isticmaalo dukumeentigan .....                       | 2  |
| Hordhaca .....  | 4  |
| Macluumaadka xidhiidhka .....                                 | 5  |
| Wax ka beddelitaanada guriga .....                            | 6  |
| Gudbinta gurigaaga kadib markey dhimasho kugu<br>timaado..... | 8  |
| Ku ilaalinta/yagleelida gurigaaga mid badbaado ah ..          | 10 |
| Hab-dhaqan.....   | 11 |
| Wadajir u-haystayaasha qandaraaska .....                      | 12 |
| Dhameeynta qandaraaskaada.....                                | 13 |
| Erayada adag .....  | 14 |

# Hordhaca




Si aad guri uga kireysato Wales waa inaad qandaraas haysataa.




Waxaa lagu aqaanayaa qandaraas-hayste.



Waxaa nalloo aqaanayaa mulkiilayaasha guriga/hantida.



Qandaraasku waxa uu dhigayaa waxa ay tahay in aad samayso iyo waxa ay tahay in aanad samayn marka aad ku nooshahay gurigaaga.



Qandaraasku waxa kale oo uu dhigayaa waxa ay tahay in aan samayno iyo waxa ay tahay inaan samayn.

# Macluumaadka xidhiidhka



Waanu inaan heynaa macluumaadkaada xidhiidhka.



Tani waa si aan kaagala hadalno qandaraaskaada haddii aan u baahanahay.



Fadlan noo sheeg:  
Magacaaga  
Lambarkaada taleefonka  
Cinwaaka iimaylkaada



Haddii macluumaadkan xidhiidhku bedelmaan, waa inaad noo sheegtaa. Waa inaad sidoo kale noo sheegtaa cidda kula nool.


# Wax ka beddelitaanada guriga




Waa inaad weydiisataa United Welsh **oggolaansho** an xoogaa wax ka beddelida guriga.




Tusaale ahaan:  
Heysashada xayawaanka rabaayadeysan Qabida CCTV  
Siinta qandaraaskaaga qof kale



Na weydiiso foomka ogolaanshaha. Waxaa laga yaabaa inaad caawinaad ugu baahato buuxinta foomka.



Waanu ka baaraan degi doonaa waxa aad na waydiisay. Waxa laga yaabaa inaa ku weydiino macluumaad dheeraad ah.




Go'aan keenu wuxuu noqon karaa haa, maya ama haa **oo ay shuruudo la socdaan.**



Noo sheeg haddii aadan ku faraxsaneeyn go'aankayaga.


## Gudbinta gurigaaga kadib markey dhimasho kugu timaado



Waxaad gurigaaga u gudbin kartaa xubin qoyskaaga ka mid ah ama daryeele kula nool kadib geeridaada.



Qofka aad u gudbineyso gurigaaga waxaa loo aqaanaa la-wareegaha lahaanshaha sharciga ah. Waxaa jira xeerar ku saabsan cidda ka la-wareegaha lahaanshaha sharciga ahaanta iyo goorta ay la wareegi karaan qandaraaskaada.



La-wareegaha lahaanshaha ee sharciga ahi waa inuu sameeyaa waxa qandaraasku qoraayo hal bil ka dib markaad dhimato.



Noo sheeg cidda kula nool iyo **xiriirka** kaala dhexeeya adiga.



Hayso dukumeentiyada si aad u cadeeyso cidda kula nool. Tusaale ahaan, biil muujinaya magacyadooda iyo cinwaankooda.



**noo sheeg**



Noo sheeg qofka aad jeclaan lahayd inaad u gudbiso gurigaaga.

**laba jeer**

**2**

Gurigaaga waxa la sii gudbin karaa ilaa laba jeer. Laga yaabo lamaanahaaga iyo ka dibna carruurtaada waaweyni.


# Ku ilaalinta/yagleelida gurigaaga mid badbaado ah



Gurigaaga nadiif ha ahaado oona ilaali.



Celtic Horizons waxay u qabataa hawlaha dayactirka ee guryaha United Welsh.



U sheeg Celtic Horizons haddii wax gurigaaga yaal uu jabo ama waxyeeloobo. Waxaa laga yaabaa inaad bixiso kharashka si loo hagaajiyo.



Waa inaan xaqiijinaa in gurigaagu ammaan yahay. Waxaanu:


Sameeyn doonaa **kormeerka ku aadan badbaadada ee korontada** ugu yaraan 1 mar 5tii sanaba Ku rakibi doonaa **alaarmiga qiiqa** dabaq/sagxad kasta oo gurigaaga ah Ku rakibi doonaa alaarmiga **karboon monoxsaydhka** halka uu yaalo **qalabka gaaska**



Waa inaad u ogolaataa shaqaalahayaga iyo **qandaraaslayaashayada** inay soo galaan gurigaaga si ay u sameeyaan dayactir iyo hubinada badbaadada ah.

# Hab-dhaqan

hab-dhaqanka aan  
la aqbali karin



Qandaraaskaaga waxa uu leeyahay macluumaadka ku saabsan hab-dhaqanka la mamnuucay.

Hab-dhaqan la mamnuucay macnihiisu waa hab-dhaqanka aan la aqbali karin. Tani waa in la sheego ama la sameeyo waxyaabo dadka ka cadhaysiiya.



Tusaale ahaan:

U waxyeeleeyn gurigaaga si ula kac ah  
Uga tagista qashinka waddada ama guryaha  
deriskaaga

Qaylo badan

Sigaar ku cabidda meelaha deriskaagu ay  
isticmaalaan Caayida ama waxyeelaynta dadka

Qandaraaska

Qandaraaska



Waan dhameeyn karnaa qandaraaskaada  
haddii aad u dhaqanto si aan la aqbali karin.

**Sidoo kale:**

noo sheeg




Noo sheeg haddii deriskaaga ama qof kale oo  
gurigaaga kuu dhow u dhaqmo si aan la aqbali  
karin.

# Wadajir u-haystayaasha qandaraaska




Waxaad naga codsan kartaa inaan ku darno qandaraaskaaga qof aad rabto inaad la noolaato. Tusaale ahaan, lammaane.

Qofkani waxa uu noqonayaa qandaraas-haystaha wadajirka ah haddii aan nidhaahno haa. Markaa kadibna waa inay raacaan shuruucda qandaraaska.



Waxa laga yaabaa in aan nidhaahno maya in lagu daro qandaraas-haystaha wadajir ah.

## Sidoo kale:



Qandaraas-haystaha wadajirka ah ayaa naga codsan kara inaan dhameeyno qandaraaskooda. Waa inay kuu sheegaan haddii ay rabaan inay dhameeyaan qandaraaskooda.


Waan dhameeyn karnaa qandaraaskooda haddii aysan kula sii nooleeyn mar danbe.



Waan dhameeyn karnaa qandaraaskooda haddii ay u dhaqmaan si aan la aqbali karin. Tani waa in la sheego ama la sameeyo waxyaabo dadka ka cadhaysiia.


# Dhameeynta qandaraaskaada

## Guri dhaqaaqayo




Waa inaad noo sheegtaa haddii aad rabto inaad ka guurto gurigaaga.

## Bixi



Waa inaad bixisaa ijaar kasta oo lagugu leeyahay. Waxa kale oo laga yaabaa inaad u baahato inaad bixiso kharashyada dayactirka.


## Taariikhda



Waa inaan ku heshiino taariikhda uu qandaraaskaadu dhammaanayo

## Sidoo kale:

## ogeysiis



Waxaan dhameeyn karnaa qandaraaskaada annagoo isla mar ahaantaa ku siineeyna ogeysiis.

Ogaysiisku waa foom qoran oo kuu sheegaya waxaad ay tahay inaad sameyso, iyo goorta.

Waxaan rajeyneynaa inaad ku faraxsan tahay gurigaaga.

---

## **Erayada adag**

### **Oggolaanshaha**

Tani waxay ka dhigan tahay inaad u baahan tahay ogolaansho si ay taasi u dhacdo. United Welsh waa inay ku tiraahdaa haa si aad ogolaansho u hesho.

### **Shuruuddaha**

Kuwani waa waxyaabaha ay tahay inay dhacaan si aad oggolaansho u hesho.

Tusaale ahaan, waxaad weydiisatay inaad CCTV ku xidhato guriga. Waxaanu ku nidhi haa, laakiin waxa kaliya oo aad kamarad ku dhejisan kartaa albaabkaaga hore. Kamarad kuma dhejisan kartid albaabkaaga dambe. Tani waa shuruud.

### **La-wareegaha lahaanshaha ee sharciga ah**

La-wareegaha lahaanshaha sharciga ahi waa qof ku noolaan kara gurigaaga oona qaadan kara qandaraaskaada dhimashadaada ka dib.

### **Xidhiidhka**

Xidhiidhku waa qof xubinka qoyska ka mid ah, sida lammaanaha, wiilkaada ama gabadhaada. Waxa kale oo ay/uu noqon kartaakaraa qof muhiim u ah noloshada, sida daryeele.

### **Kormeerka badbaadada ee korontada**

Tani waa eegida si loo xaqiijiyo in korontadu ay ammaan ku tahay gurigaaga. Korontadu waxay quwadeeysaa waxyaabaha, sida nalalkaaga iyo TV-gaaga.

### **Alaarmiga qiiqa**

Alaarmiga qiiqu wuxuu sameeyaa qeylo haddii uu qiiq badan yeesho gurigaaga. Qiiqu wuxuu la macno noqon karaa inuu dab jiro.

## **Karbon monoxsaydh**

Karbon monoxsaydhku (Carbon monoxide, CO) waa gaas sun ah. CO-gu wuxuu noqon karaa mid dilaa ah. Waa khatar sababtoo ah ma arki kartid, dhadhamin kartid mana urin kartid.

## **Qalabka gaaska**

Kani waa mishiin isticmaala gaas si uu u shido.

## **Qandaraaslayaasha**

Kuwani waa dadka iyo ganacsiyada u qabtaan shaqooyinka United Welsh. Tusaale ahaan, waxa laga yaabaa in aanu u shaqaaleysano qandaraasle si uu dabaq/sagxad cusub ugu sameeyo gurigaaga.